Xog. Guud:
Hola dirwaaqeliyo
8/2/16

**GOLAHA SHACABKA**
**JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA**

Taariikh: February 07, 2016

**Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya**

**Ujeeddo: Soo Jeedin (Mooshin) Cadeynta Xasaanadda Xildhibaanka Golaha Shacabka**

Ka dib, markaan dhageysanay Khudbaddii Madaxweynaha JFS Mudane Xassan Sheekh Maxamuud uu ka jeediyey Fadhigii aan caadiga aheyn ee Golaha Shacabka Maanta oo ay taariikhdu tahay 07/02/2016, taasi oo si gaar ah uga hadlay in Xildhibaanada iyo Wasiirada ay iska bilaabaan in la baaro oogadooda qof ahaaneed, arrinkaas oo meesha ka saaraya Xasaanadda uu leeyahay Xildhibaanka Golaha Shacabka JFS.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, hadalkaas (Arrinkaas) wuxuu iska horkeeni karaa Ciidamada Ammaanka iyo Mudanayaasha Golaha Shacabka JFS, sidoo kale wuxuu shacabka Soomaaliyeed gelinkaraa inay ka marin habaabaan qaanuunka dalka u yaala, maadaama uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu xurmeyn waayey Dastuurka KMG ee JFS.

Haddaba, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, annagoo tuskaneyna Cutubka 6aad ee Dastuurka KMG Qodobkiisa 70aad Faqradiisa 2aad waxaan si deg deg ah uga dabatageynaa hadalkii Madaxweynaha si aan loogu xadgudbin Xasaanadda Xildhibaanka Golaha Shacabka, waana in aad qoraal ahaan ugu cadeysaa Mudane Guddoomiye in aan lagu xadgudbi karin Xasaanadda Xildhibaanka e ku cad Dastuurka KMG C. 6aad, Q.70aad, F.2aad oo u dhigan ***Haddii aan laga heysan Ogolaasho Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federalka ah, Xildhibaanka laguma qaadi karo dacwad ciqaabeed, lama xeri karo lamina baari karo qof ahaan, gurigiisa ama meeshii kale ee u gaar ah, haddaan lagu qaban***

JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
SOO GELID
NO: 1776

***asagoon faraha kula jirin dambi ay tahay in laga soo saaro amar qabasho ah. Sidoo kale haddii aanan laga helin ogolaansho Xildhibaanka lama qaban karo, xabsina laguma heyn karo iyadoo la fulinaayo Xukun Maxkamadeed oo xitaa kama dambeys ah).***

Mudane Guddoomiye, sababkasta oo keentay in Amniga la adkeeyo laguma xadgudbi karo Xasaanadda Xildhibaanka, qoraalkaasoo loo gudbin doono Madaxda Hey'adaha Dowladda sida: Madaxweynaha Jamahuuriyadda, Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Garsoonka iyo Dhammaan Laamaha Amniga.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, sidoo kale Xildhibaanadda Golaha Shacabka ee ku saxiixan soo jeedintaan (Mooshinkaan) waxey si deg deg ah u dalbanayaan in la horkeeno Golaha:-

1. Wasiirka Amniga
2. Wasiirka Gaanshaandhigga
3. Wasiirka Caddaalada
4. Iyo Dhammaan Taliyaasha Ciidamada Qalabka Sida

Oo ka wada tirsan Guddiga Amniga Qaranka si su'aalo looga weydiiyo dhiilada keentay in uu Madaxweynuhu Golaha Shacabka ka horjeediyo in Xildhibaanada Golaha Shacabka la baaro oogadooda qof ahaaneed, taasoo muujineysaa ku dhaqan la'aan shuruucda Dalka u taala.

Mudane Guddoomiye, gaba-gabadii waxaa halkaan ku saxiixan Magacyada Xildhibaanadii soo diyaariyey Soo Jeedintaan (Mooshinkaan) iyo Saxiixyadooda oo kala ah:-

| **Magaca Xildhibaanka** | **Saxiix** |
|---|---|
| Hon. KHADIIJA MAXAMED DIIRIYE | [signature] |
| XIL. Mustaf Mukhtaar Gundow | M M Gundow |
| Xildhibaan Bishaaro Cabdi | [signature] |

Xil. MAXAMED CABDI MAXAMED
5. XIL. Mohamed Nuuradiin Hassan -
6. XIL. Cabdullahi Maxamed Cise
7 - XIL. Khadra Axmed Ibrahim
8 - " ALI HASSAN Goyow
9 - Xil. faisal omar guled
0 - Xil SOYAN ABDI WARSAME
1 - XIL MOHAMED ABDI YUSUF
2 - " ABDULLAHI SHEIKH ISMAIL
3 - " sh Ahmed Kasaar Cilmi
4 " Maxamed Cali dahiye
5. " XITS Muuse Cawl
Xil Secid Xasan Cireed
- Xild: Yusuf maxamed Ismail
- Xil Yuusuf Xalle ...
- Xild. maxamed Xirsi Awcali
- Xil. MAXAMED X. Cabdi
- Xil. Avv. Jahir Hassan Abdi
- Xil. Cabdalla Boos
- XIL. Mahdi Cali Cusman
Xil. Ibraahim Seelax Dayfalle
Xil Dr. Ahmed Adow
Xildh. C/casim Cabdulahi Mohamed

27. Cabdi Xaashi Cabdulahi
28. Sahra J. Ali
29. Ibrahim Suleeman
30. Ali Ahmed Mohamed
31 Shuuriye M... Afrah
32. ABDULLAHI - DAIB
33. Aaden Maxed M...
34- Ubah Tahlil Warsame
35- Osman Mukhtar Moxed
36. Abdirahman Hash Jibril
37- CABDI SHIRE JAAMAC
38. Raabaco Sheikh Nur
39- Habiibo muhamed Keer
40. Caweys... Ibrah
41- Saaga aden Maxamed
42- Amina Omar Jama
43. Mohamed Bello
44 Abdulaaziz ...
45 [illegible]
46 Luul Cabdi Aadan
47. Abdullahi yusuf Ali
48. Ashakos Mahamud Omer
49- Mohamed Ahmed Keyan
50 - ABDULLAHI AHMED HUSSIN

51 Fariir Daame Xirsi

52 Xd. Sharif Maxed

53 Fawzia Y. H. Adam

54 Mohamed Ahmed M Kulali